
# Suugaanta Abwaan Kediye: Baryada iyo Weynaynta Raxmaanka

**W/Q Axmed Sanwilwilo**
**May 25, 2025**

---

Suugaantu waa mid ka mid ah agabyada loo isticmaalo in lagu muujiyo dareennada gudaha ee dadka, waxaa lagu sawiraa oo lagu xardhaa dareenno aan loo sheegi karin si caadi ah. Waxa ay dad badani ku dhex dhisaan xasuuso ma guuraan ah, iyagoo meel fog ka soo rujiya dareen gubaya ama mid damqinaya, si taas la mid ahna waxaa jira dareenno farxadeed oo lubbiga dadka ku abuuran oo ay suugaantu u noqoto marar badan dawyo lagu muujiyo. Kolka aynu ka istaagno dhanka diimaha, waxa aan si buuxda uga dhex arki karnaa in suugaanyahannadu badanaa ay u qaybsamaan laba kooxood, kuwo hibadoodu ay qaadqaado oo ka dheeraada awaamiirta samaawiga ah, dadkana ku duufsada ereyadooda iyo kuwo aqbala oo sameeya camalo wanaagsan una hogaansama amarrada samaawiga ah. Kuwaas oo suugaantooda badideed ku dhisa wayneynta Rabbi, baryadiisa iyo toosinta adoomadiisa. Kolka Islaamka la joogo, Muslimiintu waxa ay si aad ah u adeeegsadaan suugaanta, iyaga oo ku cabbiriya dareennadooda gudeed ee diinta, si gaar ahna marka loo tilmaamayo dadka Suufiyada ah ee ka saahiday arrimaha adduunyada. Suufiyada, waxa ay suugaantu u tahay cariyayaal ku cariya muxibada ay diinta iyo Alle u qabaan, waxa uuna qayb ka qaataa kobcinta jacaylkoodaas, sidoo kale waa u agab ay ku baryaan Ilaahay.


Abwaan Jaamac Kediya (Alla yaraxma)

Soomaalida oo ku suntan dad Muslimiin ah, sidoo kale, lagu tilmaamo bulsho hadal, oo wax isugu gudbisa, ku kaydsata, isku guubaabisa oo danahooda uga hadasha laamaha kala duwan ee suugaanta, waxa ay qayb weyn oo suugaanta ah u adeegsadeen noolaynta ruuxdooda. Sida dunida kaleba, suufiyada ayaa ah qolyaha jacaylkooda rabbaaniga ah ku dhisa suugaanta, badina hiboolayaasha diinta u janjeera waxa ay hibadooda u huraan sidii ay u waynayn lahaayeen una xusi lahayeen diintooda. Dhanka haweenka waxaa caan ka ah goobaha sitaadka oo haweenka Soomaaliyeed u ah mawlacyo ay ku digriyaan, wax isku baraan, isku caawiyaan, sidoo kalena,

ay ku kobciyaan dareennadooda lubbiga ku kaydsan ee muxibada Alle, Nabi Muxamed NNKH iyo hooyooyinkii Muslimiinta oo ay ka mid yihiin Xaawa, Maryama, Khadiija iyo Faadima.

Haweenka Sitaadku waxa ay akhriyaan qasiidooyin ay intaasba ku waynaynayaan, qasiidooyin ay isku farayaan waxa diintu fartay iyo waxa ay ka reebtay, qasiidooyin ay laabtooda ugu qaboojinayaan jacaylkooda rabbaaniga ah, kuna baryayaan Ilaahay.

Kolka laga yimaado suufiyada iyo haweenka Soomaaliyeed ee leh ama ku xiran mawlacyada sitaadka, waxaa jira abwaano badan oo iyagu suugaantooda dhextaal uga dhigay digriga Alle, waa abwaano ku caan baxay baryada iyo wayneynta Ilaahay, suugaantoodana ku suugaameeyay jacaylka Ilaahay. Abwaan Jaamac Kediye waxa uu ka mid yahay abwaanadaa, waxa uuna ku suntan yahay suugaan lagu sharfo oo lagu wayneeyo Raxmaanka.

Sida ku xusan buugga Diiwaanka Jaamac Kediye Cilmi ee Soomaali Baan Ahay, abwaan Jaamac Kediye ma aanu dhigan dugsi, malcaaamad iyo jaamacad midna, haddana kolka aad eegto qaabka uu uga waramo aqoonta diinta iyo midda maadiga ah, waxaad aaminaysaa in uu yahay aqoonyahay meel sare ka gaaray goobaha waxbarashada. Badiyaaba gabayadiisa ku saabsan diintana waxa aad ka dheehanaysaa in uu dhawrkii baydba uu kuugu soo koobayo qayb dhan oo diinta ku saabsan.

Jaamac Kadiye waxa uu ku dhashay dooxo ku taalla gobolka Sool, xilli lagu qiyaasay 1950-kii, waxa uu hibadiisa abwaannimo ama hal abuurrnimo helay isaga oo aad u yar, waxa uuna ku tilmaamay in ay sabab u ahayd xilliyada cawayska ah in uu ag fadhiisan jiray oo la cawayn jiray ragga waa weyn ee waxgaradka ah iyo geeljirayaasha. Taas oo ay sabab u aheyd Jaamac hooyadii oo dhimatay isaga oo da’ yar. Hibadiisa uu halkaa ka soo dhaqaajiyay ama ka soo billabantay, ayuu Jaamac wax ku tirinayay illaa laga soo gaaray galabnimo Arbaca ah oo ay ku aadaneed 16kii Ogoosto 2023 oo uu abwaanku ku geeriyooday gantaal ay Soomaalilaan ku ridday magaalada Laascaanood, oo abwaanku deganaa.

Alle ha u naxariiste, abwaan Jaamac waxa uu caan ku ahaa suugaanta wadaniyadda oo aan dhihi karo waa qaybta ugu weyn ee ay maansooyinkiisu (oo gabaygu u badan yahay) ka waramayaan, sidoo kale, waxa uu caan ku ahaa suugaanta wacdiga iyo Alle bariga oo uu badiyaaba ku weyneyn jiray Ilaahay, kuna tilmaami jiray naxariistiisa, deeqsinimadiisa iyo sida uu u karo wax walba. Waana qeybta gundhiga u ah, oo aan isku dayayo in aan maqaalkan kaga waramo.

*Toddobada cir Ilaahii callaqay waysku wada cayne*
*Carshigiyo Ilaahii kursiga caadda sare geeyay*
*Cadceeddiyo Ilaahii dayaxa nuurka ku caddeeyay*
*Ilaahii carrada noo gogliyo badaha ceegaaga*
*Dhirta caynba-caynka ah Allihii cimidh u soo saaray*
*Caleentana ku daahayee ka dhigay midab cagaariin ah*
*Isagaa xaq lagu caabudaa lana ciseeyaaye*
…

*Cid waliba wax bay tabanaysaa oo ka cabataaye*
*Hayeeshee cidhiidhiga Ilaah caawiyaa jira e*

Cidhiidhiga, Diiwaanka Jaamac Kediye

Kolka ay uumiyuhu dareemaan argagax iyo murugo waa kuwo u orda xagga Ilaahay (al-Macaarij, 19), waa meesha kaliya ee ay miciin bidaan oo laabahooda ku xasiliyaan, kolka ay timaado dhibaato guudna waxa ay raadiyaan cidda sida ugu mudan dareenkooda ugu bandhigi karta Ilaahay. Abwaan Jaamac waxa uu deegaankiisa ka ahaa abwaan roobdoon, waxa uu ku suntanaa nin Alle yaqaan ah, suugaantiisuna cabbiri karto xaalka bulshadiisa. Gabaya dhawr ah ayuu abwaanku u tiriyay roobdoon, ereyada iyo sida uu abwaanku xaalka deegaanka u sifaynayo isaga oo aan ka tagayn in uu muujiyo iimaankiisa ayaa cajab badan, waxaana laabaha dadka ruxaysa sida uu rooxaaniyadda qofeed ee ku tolan diinta uu ereyadiisa ugu dhisayo, waxa ay ereyadiisu carinayaan jacaylka Alle ee badanaaba rabbaaniga ah isaga oo muujinaya deeqsinimada Alle iyo miisaanka uu iimaanku lee yahay, waa kan leh;

*Abaar baad mar qudha doojisaa ubaxna beertaaye*
*Ayaan kaliya baad reer dhisnaa eber ka yeeshaaye*
*Ayaamana afkaad joojisa, waadna abidaaye*
*Gaal ku inkiraayaa Rabboow aayatiin hela e*
*Iyana qaar Islaamaa jiroo la imtixaamaayee*
*Mid ooya iyo midkii aamusee samir Ilaah yeesha*
*Iimaankiyo adkaysiga dadkaa la isku eegaaye*
*Ilaahayow Illaah kale ma jiro adiga mooyaanee*

Alle-Bari, Diiwaanka Jaamac Kediye

Gabaygan Alla-Bari waxa uu abwaanku ku muujinayaa awoodaha Ilaahay. Waxa uu abwaanku tibaaxayaa sida uu Alle aanu baahi ugu qabin wax walba, xataa haddii ay dadkoo dhan islaamaan aanay isaga wax yar u tari karin. Waxa uu muujinayaa waynidiisa, aqoonbadnisiisa iyo sida uu u mudan yahay in isaga mooyee aan cid kale la caabudin; "Ashahaado adigaa leh iyo Eebboow qiritaane". Bayd walba waxa uu ku fadhiisiyay abwaanku quraan iyo xadiis oo waxa aad ka dhex akhrisanaysaa tilmaamaha Alle ee nabigeenna Muxammed NNKH ina soo gaarsiiyay.

*Aakhiriyo adduunyada ma jiro axad ku gaadhaaye*
*Awoodaada shay lihi ma jiro kuna egaayaaye*
*Kuumana ekaan karo waxaad adigu uuntaaye*
*Ikhtiyaar aduun baa leh iyo amar-ku-taaglayne*
*Awooddiyo lixaadkaaga iyo amarradaad dhiibto*
*Sidii bay ahaadaan waxaad adigu doontaaye*
*Adigaa iskaaga u tashada oo amiiri ahe*
*Ilaahoow Ilaah kale ma jiro adiga mooyaane*

*Wixii aad abuurtoo dhan oo urursan oo jooga*
*Addimaad haddii lagu arkiyo ereyga tawxiidka*
*Oo ay Islaam wada qirtaan jecel Ilaahooda*
*Irbad caaradeed kuma taraan aadmigoo shiraye*
*Ajar iyo abaal kama rabtid oo waan ogsoonahaye*

*Adigaanse kuu baahanahay kali ahaantaaye*
*Ilaahoow Ilaah kale ma jiro adiga mooyaane*

Alle-Bari, Diiwaanka Jaamac Kediye

Abwaan Jaamac waxa uu aad u yaqaanay sida qiimiga badan ee Alle loo baryo, sida loogu soo bandhigto baahida oo la isu dhuldhigo. Waxa uu ereyadiisa ku dhisi jiray ammaanta Ilaahay iyo sida ay muhiimka u tahay in adoonka Alle baryayaa is dhuldhigo, isaga oo qirsan in Alle wax walba og yahay ayuu haddana u warami jiray isagoo ergo ka ah dhibaato uunka wada haysata. Gabaygiisa Haqabtire oo ah gabay roobdoon ah ayuu abwaanku Ilaahay ugu cabanayaa, waxa uu uga waramayaa abaarta uu ka gabyayo sida ay uunka u saameysay, kolka laga yimaado cabashada, waxa uu ku soo gunaanadayaa awoodda iyo weynida Ilaahay, baydka u danbeeyana waxa uu ku caddaynayaa in uu silica jira idilkeed uu Alle ka hoosgalay, arrimihiisa iyo tan bulshadana isaga u dhiibtay, waa kan leh;

*Ilaahayoow hor kii jiray ayaad tahay hoggaanshow e*
*Haddeertana Allaha Haadiyoo maamulkaba haysta*
*Hadhowtana ka waaraa tahoo hadhaya Eeboow e*
*Halqigaad abuurtiyo waxaa dunida heehaaba*
*Risiqooda adigaa hayiyo waxay hiraabtaane*
*Hayiin iyo dayiinkoo dhan baad halabo siisaaye*
*Adigaan hadhuub kaa dhinmayn kana hungoobayne*
*Ma hagrade aduun baa na huba haatan saan nahaye*
*Adaan silica kaa hoos galnaye adigu noo hiili.*

Haqabtire, Diiwaanka Jaamac Kediye

Abwaan Jaamac gabayo dhawr ah oo roobdoonta ku saabsan ayuu mariyay. Waxaase jirtay waqti ay abaar daran ka dhacday dalka, si gaar ahna gobollada Sool iyo Sanaag, waxa ay ka soo bilaabanaysay 2003dii. Abaartaasii waxa ay madhisay badi xoolihii oo waxaa jiray dad u go’ay abaartaa daran ee jirtay, abwaan Kediya oo isagu Sool ka soo jeeday waxa uu tiriyay gabayo dhawr ah oo uu Alle uga baryayo roob, ergona u yahay dadkiisa. Waxaana ka mid ah gabayadaa midka la magac baxay Noo Di’i Allahayoow.

Ggabaygan waxa uu bilowgaba abwaanku tilmaamayaa in roobka keenistiisa iyo joojintiisa ay Alle labadaba u fudud yihiin. Waxa uuna tilmaamayaa in Alle ciddii uu doono roobka siiyo, ciddii uu doonanana badda kaga daadiyo, iyada oo ay ka tahay is-dhuldhig. Dhanka kalena waxa uu xusayaa in la ganaaxayo aadmiga haddii aanay joojin ama ka tagin wixii uu Alle uga digay. Is-dhuldhig ka dib, abwaan Jaamac waxa uu Alle uga waramayaa sida ay abaartu u saamaysay iyo sida ay rajadoodu tahay (isagoo qirsan in Alle labadaba og yahay). Waxa uuna u tibaaxayaa nooca bulsho iyo qaybaha ay kala yihiin, isaga oo ku xejinayaa baryo uu Alle ka baryayo nimcooyinkiisa uu roobka u weyn yahay markan. Waakan abwaanku isaga oo ku soo xiray gabayga tilmaamta dadka jilicsan ee abaarto saamaysay iyo sida uu u yahay abwaanku mid bulshada matalaya;

*Hadduu maalka dabarkiisu go’o amuu daleeloobo*
*Dumarkiyo Allahayoow carruur dabaqaddii hoose*

*Waxaa jira duqay aan wax kale lagula daalayne*
*Darkaasaan awood kale lahayn kana dambaynayne*
*Allahayoow darbiguu ku asturnaa ha u daleelayne*
*Dacwaddiyo Allahayoow baryadan aan duddubinaayo*
*Aannaan ka daalayn afkana aanan ka daynaynin*
*Qof waliba dantuu rabo markuu adiga kaa doono*
*Aniguna dadweynoo dhan baan ugu duceeyaaye*
*Allahayoow cusriga naga dul qaad waa na daashadaye.*

Noo Di'i Allahayoow; Diiwaanka Jaamac Kediye

Gabayga Raxmaad waxa uu isna ka mid yahay gabayada uu abwaan Jaamac ka tiriyay abaarta aan kor ku soo sheegnay ee dhacday sannadadii 2003-2004. Markan waxa uu abwaanku ka tagay Garoowe oo waxa uu aaday Laascaanood oo abaar daran ka jirto. Kolkii uu arkay sida uu u eg yahay dhulka uu sii dhex maray ayuu gabaygan tiriyay. Abwaan Jaamac gabayadiisa Alle-Bariga ah waxaa aad looga dhex arkaa qaabkii uu nabi Sakariye Alle u baryi jiray, isaga oo is dhuldhigaya ogyahayna in Alle uga aqoon badan yahay xaalka uu ku jiro, haddana uu ugu warami jiray. Waxa uu gabaygan ku tilmaamaya dadka ka leexday jidka Alle ama diiday waxii Alle faray, waxa uuna caddaynayaa in aanay ku heshiin qaladkooda oo ay iyaga ku kali yihiin, ka dib ayuu xusayaa xaalka uu dadka ku sugan yahay, gaar ahaanna kuwa jilicsan. Waxa uuna ku gabagabaynayaa sharfid, weynayn iyo baryo;

*Shaqadiyo awooddaada iyo sharafta kuu gaar ah*
*Markii aan shallayniyo baryada sheerkaad nagu siiso*
*Adigaa shafeecada hayoo Shaafi baad tahaye*
*Allahayoow raxmaad lagu shukriyo adigu noo soo shub*

Raxmaad; Diiwaanka Jaamac Kediye

Gabayga Casaa Wajallaa waxa uu abwaanku tiriyay sannadku markuu ahaa 1991dii, waa xilli ay hal mar wada dheceen burburkii dawladdii dhexe ee Soomaaliya, dagaalo sokeeye iyo abaar. Sidii caadadda u ahayd ayuu abwaan Jaamac gabay ku baryayaa Ilaahay, isaga oo matalaya dhammaan bulshada ay abaartu saamaysay. Jaamac, maadaama uu bulshada matalayo waxa uu hordhacaba qirayaa qaladaadka iyo dambiyada ka dhaca bulshada qaarkeed. Dhanka kalena waxa uu xusayaa dadka wanaagsan ee ku dhex jira oo uu Alle ku tuugayo wanaagooda. Intaa ka dib waxa uu Alle u tilmaamaya sida ay abaartu u saamaysay iyo sida wax walba loo waayay, isaga oo xusayaa ceelasha, bannaanka, cirka iyo dhulka deegaankiisa idilkii. Waxa uu gabaygan abwaanku ku soo xirayaa in aanay jirin ciirsi kale oo aan Alle ahayn;

*Allahayoow warshado caadiyoo waayo lagu ceesho*
*Ama ceelal shiidaal ah oo calafka loo doonto*
*Ama beero cayncayn ah oo na cokanaysiiya*
*Ama dawlad caawimo leh oo calan leh oo taagan*
*Casiis adiga mooyee inaanaan ciirsi kale haysan*
*Adigaa caddaan u arkayoo caarif baad tahaye*
*Casaa Wajalla noo gargaar waan cabsanaynaaye.*

Casa Wajallaa; Diiwaanka Jaamac Kediye

Kolka laga yimaado gabayada roobdoonta ah, abwaan Jaamac waxa uu lee yahay gabayo kale oo baryada iyo weynaynta Ilaahay khuseeya.

Waxaa jira gabay la magac baxay Ka Cabsada oo uu abwaanku u tiriyay in uu bulshada ku wacdiyo. Waxa uuna tiriyay 2018kii maalin ciid ah. Sida gabayga laga dhex arki doono abwaanku waxa uu sheegayaa awoodaha Ilaahay iyo mudnaanta ah in la caabudo. Waxa uuna gabaygu u badan yahay aayado iyo axaadiis suugaan loo rogay. Waa kan qayb ka mid ah gabayga oo uu abwaanku Alle ku sifaynayo;

*Karti iyo dul kaartiyo awood korasho dheeraad ah*
*Kasmadiyo aqoontiyo caqliga kabasho loo aayo*
*Kariimnimo kasaad iyo dul iyo kibir hadduu doono*
*Kulli waxay u furanyiin Ilaah keligii weeyaane*
*Rabbina waa kabiirkaan ognoo keligii weeyaane*
*Kaan korraynta lagu haysannine keligii weeyaane*
*Kaynaan arkine ina arkaa keligii weeyaane*
*Kan wax dilee wax noolayn karaa keligii weeyaane*
*Kan kafaalo-qaadaa khalqiga keligii weeyaane*

*Koonka oo dhan buu leeyahoo keligii weeyaane*
*Toddobada cir buu kaamiloo keligii weeyaane*
*Kursigiyo carshiguu raaray oo keligii weeyaane*
*Arladanuu kalsooni u dhisoo keligii weeyaane*
*Badahaa kuraambaynayee laga kalluumaysto*
*Isagaa biyaha keenayoo keligii weeyaane*
*Kutubahoo dhan buu lee yahoo keligii weeyaane*
*Kalaamkiisii baa lagu qorayoo keligii weeyaane*
*Kunka shay ee nool buu khalqayoo keligii weeyaane*
*Kadabkoodii buu wada qorayoo keligii weeyaane*
*Kufri iyo Islaam iyo jin iyo kuman cawaaniin ah*
*Kulli caabudaad buu farayoo keligii weeyaane*
*Kan sujuudda waajiba iska leh keligii weeyaane*

Halkaas ayuu wacdiga gabayga ka sii wadayaa una sii xusayaa awoodaha Rabbi, isaga oo ku soo xirayaa dhawrkan bayd oo uu ku qirayo in uu jidka Alle ku taagan yahay, Allena waydiisanayo janno, sidoo kale, dadka ugu baaqayo in ay Rabbi ka cabsadaan;

*Anigana Kariimkay khalqoo kaafir maan noqone*
*Kuwa sanamka caabudanayoo Kiristamkaw ciida*
*Kaniisadaha uma raacin oo koob lamaan shubane*
*Kama tegin Furqaan oo wax kale ma aanan kaalmayne*
*Korreeyoow Allahayoow Jannaan kaa dalbanayaaye*
*Ka cabsada Ilaah wuxuu karaa waxaad ka doontaane*

*Ku cabsada kalsoonida Rabbiyoo Nebiga kaalmaysta*

Ka Cabsada; Diiwaanka Jaamac Kediye

Waxaa iyaduna jirta jiifto la magacbaxday Tawxiid oo uu abwaan Jaamac Kediye ku sheegayo tiirarka Islaamka, tiirarka Iimaanka iyo sagaal iyo sagaashanka magac ee Ilaahay. Jiiftadani waa diiwaan lagu xifdiyi karo magacyada Ilaahay si kooban. Marka uu intaa taxo ayuu ku soo gunaanadayaa baryo, waa kan leh;

*Awoodloow Allahayoow*
*Arsaaqoow Allahayoow*
*Wax kastaba ogaadoow*
*Eebboow Allahayoow*
*Waxaan kaa idmanayaa*
*Ama kaa abbaarsaday*
*Afka waxaan ka sheegtiyo*
*Uurka waxaan ka doonaba*
*Ereyada samaanta leh*
*Saacadaha ijaabada*
*Inaad naga ajiibtaa*
*Aqbashaa Allahayoow.*

Tawxiid; Diiwaanka Jaamac Kediye

Waxa aan isku dayaa in aan iyadana xuso gabay uu abwaan Jaamac ka tiriyay siirada nabigeenna Muxammed NNKH, sida uu Cabdirisaaq Cumar xusayna la odhan karo waa kitaabkii lagu soo koobay taariikhda Nebiga (Khulaasatu Nuurul Yaqiin) oo qaab suugaan ah loo tarjumay. Waxa uu gabaygan abwaanku kaga waramayaa dhalashadii nabiga NNKH illaa dhammaystirka diinta ee Quraanka laga dammaystirayay. Gabaygan qiimigaa leh ee ku saabsan suubaneheena NNKH, waxaa la dhahaa Caamul Fiil, qayb ka mid ahna waa tan;

*Caddad shana toddobadoo cayiman cidhifka oo kow ah*
*Caamulfiilka Nebigii dhashiyo tirada caynkaas ah*
*Cabdillaahi waa aabbihii curadkii weynaaye*
*Oo Cabdimudalib waw awoow lama cadaabaane*
*Cuddoon Aaminaa diahatay iyo caylad khayr badane*
*Iyadaa canqarintiisii hore siisay caanaha e*
*Isagoo cabbaar gaaban jiroo yare la coogcoogay*
*Nebigii markii loo cabsaday Caadilku u hiilshay*
*Nebigay Sacdiya caawisoo cugatay oo qaaday*
*…*
*Rabbul caalamiinkeenna iyo caaganoow nebiga*
*Citiraafnay oo raacnay oo maanu caasiyine.*

Caamul Fiil; Diiwaanka Jaamac Kediye

Waxa aan doonayaa in aan ku soo xidho maqaalkan gabay cajiib ah oo abwaan Jaamac Kediye tiriyay, gabaygan waxaa la yidhaa Wacdi. Ka hor inta aanu abwaanku gabaygan tirin waxa uu tiriyay gabay kale oo afar bayd ka kooban uuna sheegay in ay sidaa ku dhammaystiran tahay, balse, uu mar danbe ka dhashay gabayga Wacdi.

Gabayga gaaban waxa uu tilmaamayaa sida loo hilmaamsan yahay geerida, qabriga iyo nolosha danbe, waxa uu ina ttusinayaa qoomamo ku aadan mashquulka dunida, dhan kalena waa carin, wacdi iyo qabasho. Wuxuu yidhi;

*Nin waliba in uu dhimanayoo dhababka loo qaadi*
*Oo aan la dhaafaynin waa ii sida dharaartaase*
*Qosolkaan dhag idhi dhoollahaan dhuuxa ka caddeeyay*
*Alla dhoohniyaayeey xabaal sow ku dhici maayo!*

Diiwaanka Jaamac Kediye

Gabaygan sare sidaas ayuu ku dhammaystiran yahay, mar danbe ayuu abwaanku ka tixraacay gabayga Wacdi. Gabayga Wacdi waa mid ka mid ah gabayada ugu caansan ee uu abwaan Jaamac Kediye lee yahay. Waa gabay ay maqleen badi dadka isticmaala kaadhadhka shirkadaha Golis iyo Telesom, maadaama gabaygan lagu xidhi jiray in la maqlo marka qof uu waco qof kale. Gabaygani waa Wacdi, waxa uu aad uga waramayaa geerida iyo qabriga. Inta ugu horreysa haddii aan ka xusno waxa uu dhayaa abwaanku;

*Allaa weyn Rabbi baa Waaxidaad wada taqaaniine*
*Isagaa Wadduud ah oon tashiga lala wadaagayne*
*Isagaan wuxuu doonayaba cidi la waastayne*
*Waxba kama qarsoonoo qalbigu wahan hadduu yeesho*
*Wixii waliba waw waadax iyo waasac maalina e*
*Al-Wakiilu magaciisu waa Waaris aan dhimane*

Wacdi; Diiwaanka Jaamac Kediye

**Gunaanad:**

Abwaan Jaamac Kediye kaliya ma ahayn abwaan ee waxaa u dheerayd diin iyo dal jacayl sida ka muuqata gabayadiisa, sidoo kale, waxaa ka muuqata in uu naftiisa ka dhisay dhanka aqoonta diinta iyo tan maadiga, isaga oo aan xaadirin goobaha waxbarashada.

Suugaanta abwaanka Alle naxariistii janno ha siiyee, ee kala duwan waxaa lagu kaydiyay buugga Diiwaanka Jaamac Kediye Cilmi ee la magac baxay Soomaali Baan Ahay oo uu ururinta, qaabaynta iyo faaleyntaba lee yahay Cabdirisaaq Cumar (Caddeysay). Waana buugga aan ka soo xigtay gabayada abwaanka ee ku xusan maqaalkan. Alle ha u naxariisto abwaanka, aamiin.

W/Q Axmed Sanwilwilo
Email: ahamadek2018@gmail.com